Card #________________________ Program Year **2025**
*(For official use only)*

# Codsiga Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda Da'da Weyn iyo Dhaarta ee WA

***Magaca:** _______________ _______________
(Magaca Koowaad) (Magaca Dambe)

***Taariikhda dhalashada (bisha/maalinta/sanadka):** ____/____/______
(Bisha) (Maalinta) (Sanadka)

**Cinwaanka:** ________________________________ **Lambarka Abaarmanka:** ______________

***Magaalada:** _____________________ ***Sib Koodhka:** __________ **Degmada:** _____________

**Telefoonka:** _____________________

Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda ee Waayeellada (SFMNP) ayaa wuxuu dadka waayeellada ah ee uu dakhligooda hooseeya siiyaa khudaar iyo miro markaasi la soo gurey (darey ah) iyada oo uu yoolku yahay sii wanaajinta xaaladda caafimaadkooda iyo nafaqada. Wuxuu kaloo taageeraa beerashada degaanka iyadoo la kordhinayo isticmaalka suuqyada beeraleyda iyo miisaska wadadda dhinaceeda la dhigto.

Si aad xaq ugu yeelato barnaamijka SFMNP, waa in aad ka soo baxdaa dhammaan shuruudahan soo socda:

1. **Waa in aad tahay 60 sano jir ama ka weyn (55+ haddii aad tahay Mareykan Dhalad Ah/Alaskan Dhalad Ah)**
2. **Dhakhligaaga waa in uu ka hooseeyaa 185% ee Heerka Saboolnimada Federaalka. Taasi macnaheedu waa:**
   - **$28,953 Dakhliga Sanadlaha ama $2,413 Billaha ah ee loogu talagalay 1 qof**
   - **$39,128 Dakhliga Sanadlaha ama $3,261 Billaha ah ee loogu talagalay 2 qof**
   - **Qoysaska waaweyn, kuddar $848 ee loogu talagalay qof kasta oo dheeraad ah**
3. **Waa in aad tahay qof deggan Gobolka Washington**

Marka aad saxiixdo foomkan, waxaad caddeynaysaa in aad ka soo baxdo dhammaan shuruudaha xaq u yeelashada ee kor ku xusan waxaadna qiraysaa in lagu siiyey macluumaadka Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha.

*_________________________________ *____________________
**Saxiixa Ka-qaybgalaha** **Taariikhda**

---

Fadlan ka jawaab su'aasha hoose—jawaabahaagu waa kuwo iskaa ah:

1. Miyaad isu aragtaa in aad tahay Hisbaanik/Laatiin? ☐ Haa ☐ Maya

2. *Fadlan calaamadee dhammaan kuwa ku habboon:
   - ☐ Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Dhallad ah
   - ☐ Aasiyaan
   - ☐ Afrikaan Mareykan ah
   - ☐ Caddaan
   - ☐ Hawaayan Asal ah ama Qof Jasiiradaha Kale ee Baasifiga Ka Soo-jeeda

Si waafaqsan sharciga Federaalka iyo siyaasadda Waaxda Beeraha ee Mareykanka, hay'addan waxaa ka mamnuuc ah in ay sameyso takoor ku saleysan isir, midab, asal ahaan qofka meesha uu ka soo jeedo, jinsiga, da'da, naafonimo ama aargoosi loogu talagalay xuquuqaha madaniga ee hore ee barnaamij kasta ama waxqabad kasta oo ay sameyso ama ay maalgeliso hay'adda USDA. Fadlan hoos ka eego macluumaad dheeraad ah.

***Takoor la'aan***

**Ka xoroobidda takoorka**

Hay'addan waxaa ka mamnuuc ah takoor ku saleysan jinsiga, isirka, caqiidada, diinta, midabka, qof asal ahaan meesha uu ka soo jeedo, da'da, halyeynimada ama xaaladda militeri, dookha galmo, naafonimo, ama isticmaal eyga dadka haga ama xayawaanka adeegga ee tababaran (xayawaanka adeegga waa xayawaan shakhsi ahaan loo tababarey in uu shaqo qabto ama hawlo fuliyo iyadoo u adeegayo shakhsiga naafada ah). (RCW 49.60.030)

**Bayaanka Takoor La'aanta ee USDA**

Iyadoo la raacayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo siyaasadaha iyo xeernimaadyada xuquuqda madaniga ah Waaxda Beeraha ee Mareykanka, hay'addan waxaa ka mamnuuc ah takoorka ku saleysan isirka, midabka, qofka asal ahaan dalka aad ka soo jeedo, jinsiga (oo ay ku jiraan aqoonsiga lab iyo dheddig iyo dookha galmo), naafonimo, da'da, ama aargoosiga ama aar-gudashada hawlaha xuquuqda madaniga ee hore.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado kale oo aanan ahayn Af-Ingiriisi. Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan barnaamij (t.a., Braille, daabacaad weyn, cajalad maqal ah, Luuqadda Meedaarta Mareykanka), waa in ay la xiriiraan gobolka ka mas'uulka ah ama hay'adda maxalliga ah ee maamusha barnaamijka ama Xarunta TARGET ee USDA (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama USDA kala xiriir Adeegyada War-lalinta Federaalka (800) 877-8339.

Si uu u soo gudbiyo cabashada takoorka barnaamijka, Qofka cabashada soo gudbinaya waa in uu buuxiyaa Foomka Form AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka ee barnaamijka USDA kaas oo laga heli karo barta internet-ka: https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf, xafiis kastoo ay USDA leedahay, iyadoo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa in ay ku qoran yihiin magaca qofka cabashada soo gudbinaya, cinwaanka, lambarka telefoonka, iyo sharraxaadda qoraalka ah ee tallaabada takoorka lagu eedeeyay oo si fiican u faahfaahsan si loogu wargeliyo Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqda Madaniga (ASCR) dabciga iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee lagu soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu gudbiyaa USDA:

1. **boostada:**
   U.S. Department of Agriculture
   Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
   1400 Independence Avenue, SW
   Washington, D.C. 20250-9410; ama
2. **fakis:**
   (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama
3. **Email-ka:**
   Program.Intake@usda.gov

Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.